WARGEYSKA
# DALKA

Wargeyska Dalka, Waa Wargeys ay soo saarto Wasaardda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Email:wargeyska.dalka1973@gmail.com
Email:director.dalkajournal@moi.gov.so

Twitter:dalkajournal
CADADKA 645-AAD

## TUSMADA

XULKA WARARKA WARGEYSKA
BOGGA 2-3aad
GUUXA SHACABKA
BOGGA 4-aad
FAALLO & FALANQEYN
BOGGA 5-aad
ISLAAMKA & NOLOSHA
BOGGA 6-aad
ARRIMAHA BULSHADA
BOGGA 7-aad
QUBANAHA KHAWAARIIJTA
BOGGA 8-aad
FAAFINTA RASMIGA
BOGGA -9aad

# MADAXWEYNE XASAN SHEEKH OO GANACSATADA UGU BAAQAY IN AY BIXIYAAN CANSHUURTA

Bogga 2-aad



## RA'IISUL WASAARE XAMSA OO KULAN LA YEESHAY XOGHAYAHA GUUD EE QARAMADA MIDOOBAY

Bogga 2-aad

New York:- Ra'iisul Wsaaraha XFS, Ra'iisul Wasaare Xamsa Abdi Barre, ayaa madasha kalfadhiga Golaha Guud ee Qaramada Midoobay kula kulmay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, Antonio Guterres.

Ra'iisul Wasaaraha iyo Xoghayaha Guud ayaa wada hadalkooda diiradda lagu saaray xoojinta xiriirka iyo wada shaqeynta ka dhaxeysa Soomaaliya iyo Qaramada Midoobay, iyada oo Soomaaliya ay isu diyaarineyso inay la wareegto xubinnimada kursiga Golaha Ammaanka

## MASAR IYO SOOMAALIYA OO KA WADA HADLAY ISKAASHIGA DHANKA HORUMARINTA MAGAALOOYINKA

Bogga 2-aad

Wasiirka Howlaha Guud iyo Guriyeynta ee dowladda Masar, Injineer Sherif El-Sherbiny ayaa maanta xafiiskiisa ku qaabilay, Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyeynta XFS, Mudane Siciid

## GUDDOOMIYE CABDI XAASHI OO DALKA DIB UGU SOO LAABTAY

Bogga 2-aad

Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa maanta dalka dib ugu soo laabtay ka dib booqasho labo maalmood qaadatay oo uu magaalada Abuu dubay kulan miro-dhal ah kula soo qaatay Guddoomiyaha Golaha Midnimada Qaran ee Dowladda Imaaraatka Carabta.

Guddoomiyaha ayaa intii uu ku sugnaa magaalada Abuu dubay, waxa uu kulan la qaatay dhiggiisa

# XULKA

## WARARKA WARGEYSKA

### WARBIXINTA TODOBAADKA

Bogga 9-aad

1- Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamud ayaa guddoomiyay shirka Golaha Amniga Qaranka oo looga hadley dagaalka ka dhanka ah Khawaarijta Al Shabab iyo sugidda amniga dalka.

2- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ayaa magaalada Nairobi kaga qeybgelaya Shirweynaha 6aad ee Qaramada Midoobay ee Arrimaha Degaanka.

3- Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa magaalada Muqdisho ku qaabilay Wasiiru Dowlaha Gaashaandhiga ee Dowladda Britain James Stephen Heappey.

4- Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa warqadaha aqoonsiga danjirenimo ka guddoomay Danjiraha cusub ee Kenya u fadhin doona Soomaaliya Cyprian Kubai Iringo.

5- Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa saxiixay sharciga illaalinta iyo maareynta deegaanka oo ay horray u ansixiyeen labada aqalka ee Baarlamaanka Federaalka

## SIDEEN UGA GUDUBNAA QABIIL OO AAN U DHISNAA QARAN

Bogga 4-aad

## QARANIMO MAXAA KA WEYN OO AAD RAADIN LAHEYD?

Bogga 5-aad

Bogga 7-aad

W
ARGEYSKA DALKA WAA U ADEEGAHA BULSHADA SOOMAALIYEED

## WARBIXINTA TODOBAADLAHA

Bogga 9-aad




QOYSKU WUXUU MUDAN YAHAY DARYEEL IYO NAXARIIS!!!!

# MADAXWEYNE XASAN SHEEKH OO GANACSATADA UGU BAAQAY IN AY BIXIYAAN CANSHUURTA



Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane DR Xasan Sheekh Maxamuud ayaa maanta magaalada Muqdisho ka furay shirweynaha Bankiyadda Soomaaliyeed,

Madaxweynaha oo madasha ka jeediyey khudbad dhinacyo badan taabanaysa ayaa Ganacsatadda ugu baaqay in ay bixiyaan Cashuurta ku waajibtay" ogow adeege ayaad tahay cashuurta iibka waxa laga rabaa waa qofka Soomaaliyeed ee wax gadanaya ha isku dayin in khiyaanto waa dambi" ayuu yiri Madaxweyne Xasan sheekh.

Madaxweynaha ayaa sidoo kale uga mahadceliyey Bankiyadda iyo Shirkadaha Isgaarsiinta bixinta Cashuuraha oo ay door muhiim ah ka qaateen,Madaxweynaha ayaa ku baaqay in ganacsatada kalena ku daydaan oo fududeeye u noqdaan Cashuur bixiyeyaasha.

# RA'IISUL WASAARE XAMSA OO KULAN LA YEESHAY XOGHAYAHA GUUD EE QARAMADA MIDOOBAY



New York:- Ra'iisul Wsaaraha XFS, Ra'iisul Wasaare Xamsa Abdi Barre, ayaa madasha kalfadhiga Golaha Guud ee Qaramada Midoobay kula kulmay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, Antonio Guterres.

Ra'iisul Wasaaraha iyo Xoghayaha Guud ayaa wada hadalkooda diiradda lagu saaray xoojinta xiriirka iyo wada shaqeynta ka dhaxeysa Soomaaliya iyo Qaramada Midoobay, iyada oo Soomaaliya ay isu diyaarineyso inay la wareegto xubinnimada kursiga Golaha Ammaanka ee Q.M. 2025 – 2026.

Waxaa kale oo labada hoggaamiye ay ka wada hadleen hawlgalka Qaramada Qaramada Midoobay ee Soomaaliya UNSOM, oo Xoghayaha Guud uu soo dhaweeyay soo jeedinta dowladda Soomaaliya ee ku saabsan qorshaha mustaqbalka xafiiska Qaramada Midoobay iyo dhinaca kale qorshaha ka dib bixitaanka ciidamada Midowga Afrika ee Soomaaliya.

Dhanka kale, Ra'iisul wasaaraha XFS Mudane Xamsa Cabdi Barre oo khudbad ka jeediyay shirka madaxeedka Qaramada Midoobay ayaa sheegay in dowladda oo ka duuleyso ahmiyadda Amniga u leeyahay Dalka labadii sanno ee lasoo dhaafay ku guuleysatay dagaalka ka dhanka ah khawaarijta saddex melood laba meelna laga saaray degaankadii ay argagixsada horay gacanta ugu heysay lana baabi'iyay awoodii ay ku lahayeen degaanadaa.

Ra'iisul wassaare Xamsa Cabdi Barre Ayaa tilmaamay in khawaarijta lagu qaaday dagaal saddex qeyb ah oo kala ah dagaalka tooska ah kan dhaqaale iyo in dowladdu ay xirtay barihii ay ku faafin jireen fikirka xajirnimada ah,taana ay keenatay in awooda ahaan iyo ciidan ahaanba ay burburaan khawaarijta.

"Waxaa lagala dagaalay dhinaca Maaliyadda iyo faafinta fikirkii xagjirnimad Waxaan sidoo kale daciifinay habka fikirkooda (Ideology) taasi oo wiiqday illihii taageerada"ayuu yri Ra'iisul wasaare Xamse

# MASAR IYO SOOMAALIYA OO KA WADA HADLAY ISKAASHIGA DHANKA HORUMARINTA MAGAALOOYINKA



Wasiirka Howlaha Guud iyo Guriyeynta ee dowladda Masar, Injineer Sherif El-Sherbiny ayaa maanta xafiiskiisa ku qaabilay, Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyeynta XFS, Mudane Siciid Maxamed Maxamuud, iyaga oo ka wada hadlay sidii kor loogu qaadi lahaa iskaashiga labada dal.

Injineer El-Sherbiny ayaa caddeeyay in dowladda Masar, oo uu hoggaamiyo Madaxweyne Abdel Fattah El-Sisi, ay diyaar u tahay in ay la wadaagto Soomaaliya khibradeeda dhanka horumarinta magaalooyinka.

"Masar waxay leedahay xirfadaha iyo agabka lagama maarmaanka u ah dhismaha iyo horumarinta, waxaana rajeynayaa in aan ka qayb qaadan karno mashaariic tayo leh oo kaabaya horumarka dalka," ayuu yiri El-Sherbiny.

Dhanka kale, Wasiir Siciid ayaa uga mahadceliyay Injineer El-Sherbiny soo dhaweynta, isagoo caddeeyay in Soomaaliya ay danaynayso in ay xoojiso iskaashiga ay la leedahay dawladda Masar.

Injineer El-Sherbiny ayaa sidoo kale ku booriyay dowladda Soomaaliya inay ka qayb qaadato shirka caalamiga ah ee World Urban Forum, kaas oo looga hadlayo iskaashiga caalamiga ah ee dhanka horumarinta magaalooyinka, isla markaana ay kullamo la yeeshaan shirkadaha dhismaha ee Masar.

# GUDDOOMIYE CABDI XAASHI OO DALKA DIB UGU SOO LAABTAY




Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa maanta dalka dib ugu soo laabtay ka dib booqasho labo maalmood qaadatay oo uu magaalada Abuu dubay kulan miro-dhal ah kula soo qaatay Guddoomiyaha Golaha Midnimada Qaran ee Dowladda Imaaraatka Carabta.

Guddoomiyaha ayaa intii uu ku sugnaa magaalada Abuu dubay, waxa uu kulan la qaatay dhiggiisa Guddoomiyaha Golaha Midnimada Qaran ee Dowladda Imaaraatka Carabta Mudane Saqar Gabaash oo ay ka wada hadleen xoojinta xiriirka labada dal gaar ahaan labada Baarlamaan ee ku qotoma dhinacyada iskaashiga, qibrad wadaagga, tababarrada iyo is dhaafsiga waayo aragnimada.

Dhinaca kale Guddoomiyaha oo socdaalkiisa ku soo maray magaalada Nayroobi ee dalka Kenya, ayaa booqasho u kuurgal ah waxa uu ku tegay Safaaradda Soomaaliya ee dalka Kenya, isagoo danjiraha safaaradda iyo howlwadeennada kula dardaarmay in ay si dhow oo waxtar leh ugu shaqeeyaan shacabka Soomaaliyeed ee dalkaas ku nool.

# WASIIRKA DEEGAANKA OO KA QEYB GASHAY SHIR LOOGA HADLAYAY YOOLKA CUSUB EE MIISAANIYADDA CIMILADA (NCQG)




Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, Amb. Khadija Mohamed Al-makhzoumi, ayaa ka qeybgashay Shirka Wasiirrada ee looga hadlayay Yoolka Cusub ee Miisaaniyadda Cimilada (NCQG). Shirka oo ka dhacay magaalada New York ayaa diiradda lagu saaray sidii loo kordhin lahaa maalgelinta cimilada ee dalalka u nugul, gaar ahaan Soomaaliya oo ka mid ah dalalka ugu saameynta badan isbeddelka cimilada.

Wasiirada ayaa ku boorrisay in la sameeyo miisaaniyad ballaaran oo waafaqsan baahiyaha degdegga ah ee dalalka nugul, iyadoo mudnaanta la siinayo adkeysiga, la qabsiga isbeddelka cimilada, iyo taageerada dadaallada dhimista khataraha ey sababaan isbeddelka cimilada.

Wasiiradda ayaa sidoo kale tilmaamtay muhiimadda ay leedahay in taageerada dhaqaale lagu bixiyo deeqo aan dayn ahayn si looga hortago in dalalka dhibaateysan ay sii galaan deymo kale. Yoolkan cusub wuxuu muhiim u yahay in la xaqiijiyo in maalgelinta cimilada ay gaarto dalalka ay Soomaaliya kamid tahay, si loo xoojiyo dadaallada adkeysiga iyo la qabsiga mustaqbalka isbeddelka cimilada.

# G/GOBOLKA IYO MADAXDA WASAARADDA DEEGAANKA OO KA WADA HADLAY JOOJINTA ISTICMAALKA BACAHA




Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho Mudane Yuusuf Xuseen Jimcaale (Madaale) ayaa Aqalka Dowladda Hoose ee Xamar ku qaabilay Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cimillada XFS Mudane Axmed Maxamed Cumar iyo mas'uuliyiin kale oo ka tirsan Wasaaradda.

Wasiiru dowlaha Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada XFS ayaa warbixin ka siiyay Duqa Magaalada Muqdisho halka uu maraayo ololaha dalka looga joojinayo Bacaha halka mar la isticmaalo, dhibaatada ay deegaanka ku hayso bacda iyo xaaladaha caafimaad daro ee ka dhasha.

Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho Mudane Yuusuf Xuseen Jimcaale (Madaale) ayaa bogaadiyey dadaallada ay Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cimillada Soomaaliya ku joojineyso Bacaha halka mar la isticmaalo, taasi oo dhibaato weyn ku heysa Caafimaadka, Deegaanka iyo Bilicda Caasimadda.

# RUUSHKA OO GALBEEDKA UGA DIGAY ADEEGSIGA HUB NIYUKLEER AH



Madaxweynaha Ruushka Vladimir Putin ayaa uga digay reer galbeedka Arbacadii in Ruushku uu isticmaali karo hubka Nukliyeerka haddii lagu soo weeraro gantaalaha caadiga ah.

Putin ayaa sidoo kale sheegay in weerar kasto oo lagu soo qaado Ruushka, kaas oo ay gadaal ka taagantahay dowlad ku hubeysan niyukleer, in Moscow ay u tixgelin doonto mid si wadi jar ah loogu soo qaaday.

Putin oo furay shirka Golaha Amniga Ruushka, ayaa sheegay in isbaddaladani dhanka niyukleerka ah ay dowladdiisu uga jawaabeyso, isbaddalka deg degga ah ay ku dhacaya muuqaalka dunida kaas oo uu sheegay in uu khatar ku yahay Ruushka.

71-jirkan leh go'aanka ugu danbeeya ee Ruushka, ayaa sheegay in Ruushka uu ka fiirsan doono in uu adeegsado hubka niyukleerka, haddii dhulkiisa lagu soo weeraro gantaallada soo jireenka ah ee caadiga ah, diyaaradaha dagaalka ama kuwa aanan duuliyaha laheyn.

Ruushka ayaa muddo hadda laga joogo laba sano iyo bar ku duulay dalka deriska la ah ee Ukraine. Dagaalkaas ayaa keenay in uu aad u xumaado xiriirka Ruushka iyo dalalka reer Galbeedka, taasoo dhalisay cabsi ah la xiriirta in la isu adeegsado hub culus.

Xigasho: VOA

# BOOLISKA TANZANIA OO XIRAY XUBNAHA UGU SARREEYA MUCAARADKA

Dar es Salaam — Booliska Tanzania ayaa xiray xubnaha ugu sarreeya mucaaradka, sida uu sheegay xisbigoodu, iyadoo mas'uuliyiinta ay u dhaqaaqeen inay joojiyaan mudaaharaad ballaaran oo ka dhici lahaa caasimadda ganacsiga ee Dar es Salaam.

Inkasta oo ay jirto mamnuucista, haddana xisbiga mucaaradka ah ee Chadema ayaa wacad ku maray in uu sii wadi doono isu soo baxan oo ka dhan ah afduub iyo dil lagu eedeeyay ciidamada ammaanka.

Chadema ayaa sheegay in guddoomiyahooda Freeman Mbowe iyo ku-xigeenkiisa Tundu Lissu labaduba la xiray Isniinta, halka booliiska rabshadaha ka hortaga la dhigay goobaha muhiimka ah ee magaalada si ay uga hortagaan isu imaatinka.

"Mudaaharaadku waa xuquuqdeenna dastuuriga ah, waxaana la yaabnay baaxadda awoodda ay booliisku u adeegsanayaan inay dadka u hanjabaan, ayna ku caburiyaan xorriyaddeenna," Mbowe ayaa sidaas u sheegay taageerayaashiisa ka hor intii aanay booliisku kaxaysan, sida ka muuqata muuqaal ay xisbigu internet-ka ku faafiyeen.

Xizbiga Chadema ayaa ku eedeeyey madaxweyne Samia Suluhu Hassan in ay dalka ku soo celisay xeeladihii caburinta ee madaxweynihii ka horreeyay, John Magufuli.

Samia ayaa xilka la wareegtay ka dib dhimashadii lama filaanka ahayd ee Magufuli ee bishii Maarso 2021, waxayna u muuqatay mid muujineysa inay ogoshahay xoriyadda, iyadoo beddelaysa xannibaadaha la saaray isu soo baxyada mucaaradka iyo warbaahinta.

Balse Chadema ayaa ku eedeeyay ciidamada ammaanka inay ka dambeeyeen xubno dhowr ah oo dhawaan la waayay iyo dilkii Ali Mohamed Kibao, oo ahaa xoghaynteeda qaranka, kaasoo meydkiisa la helay horaantii bishan.

Booliiska ayaa sidoo kale hor istaagay isu soo bax maalinta dhallinyarada uu xisbigu qaban lahaa bishii Agoosto, iyaga oo xiray daraasiin ka mid ah hogaamiyayaasheeda oo ay ku jiraan Mbowe iyo Lissu.

Kooxaha xuquuqul insaanka iyo dawladaha reer galbeedka, oo uu ku jiro Maraykanku, ayaa walaac ka muujiyay caburinta soo cusboonaatay ka hor doorashooyinka dawladaha hoose ee November iyo doorashada guud oo dhici doonta dabayaaqada 2025-ka.

# ERDOGAN OO MAREYKANKA UGU BAAQAY INUU KA QAADO CUNAQABATEYNADA DIFAACA

New York — Madaxweynaha Turkiga Recep Tayyib Erdogan ayaa ku baaqay in la qaado cunaqabateynta Mareykanka ee xannibaya qaar ka mid ah iibsashada difaaca ee dalkiisa iyo tallaabooyin kale ee "halka dhinac ah".

Erdogan ayaa xayiraadahan ku sheegay in ay caqabad ku yihiin awoodda labadan dal ee xulufada NATO ah ku gaari karaan bartilmaameedyadooda ganacsi.

Xiriirka u dhexeeya Ankara iyo Washington ayaa sannadihii la soo dhaafay aad u xumaaday sababo la xiriira arrimo ay ka mid yihiin; ku kala aragti duwanaashaha siyaasadda Bariga Mediterranean-ka, Suuriya iyo Gaza.

Waxay sidoo kale ku kala tageen soo iibsashada Ankara ee nidaamka difaaca hawada ee Ruushka ee S-400, taasi oo dhalisay in Maraykanka uu cunaqabataysn saaro Turkey 2019-kii, lagana saaro Barnaamijka diyaaradaha dagaalka ee F-35.

Hase yeeshee kadib, Ankara waxay xaqiijisay inay Washington ka soo iibsato 40 diyaaradaha F-16 ah iyo 79 qalab kale oo casri ah. Heshiiska ayaa la ansixiyay ka dib markii Turkiga uu ogolaaday dalabka ay Sweden ee ku biiritaanka NATO, taasi oo hoggaamisay in xiriirka uu soo hagaago.


Ankara iyo Washington waxay leeyihiin yool fog oo ah $100 bilyan oo ganacsi laba geesood ah, taasi oo aad uga badan ganacsigii 2023 oo ahaa $30 bilyan.

Intii lagu guda jiray booqashadii New York ee Golaha Guud ee Qaramada Midoobay, Erdogan wuxuu u sheegay ganacsatada Turkiga iyo Mareykanka in, inkasta oo uu rumeysan yahay in hadafkaas uu suurtagal yahay in la gaaro, haddana iskaashiga dhinaca difaaca " uu hoos u dhacay" sababo la xiriira xayiraadaha.

"Tallaabooyinka halka dhinac ah, sida canshuuraha dheeraadka ah ee qaybaha birta iyo aluminium-ka, baaritaannada iyo cunaqabateynta CAATSA waxay u baahan yihiin in la baabi'iyo," ayuu yiri Isniintii, isaga oo tixraacaya CAATSA oo laga soo gaabiyo Ka-hortagga Cadawga Mareykanka ayada oo la adeegsanayo Xeerar Cunaqabatayn.

"Waxaan rajeynayaa inaan bog cusub furnay kadib mashruucii casriyeynta ee F-16, waxaana rajeyneynaa in xayiraadaha dhoofinta ee dhinacan si jogto ah loo qaado," ayuu Erdogan ku daray.

Waxa uu sidoo kale sheegay in Turkigu uu faa'iido u leeyahay socodka sahayda, isaga oo tusaale u soo qaatay iskaashiga xagga wax soo saarka iyo soo iibinta rasaasta 155mm - oo muhiim u ah dagaalka Ukraine iyo Ruushka.



Washington ayaa sidoo kale cunaqabateyn ku soo rogtay dhowr qof oo Turkish ah iyo shirkado laga leeyahay dalka Turkiga oo lagu eedeeyay inay jebinayaan cunaqabateynta ka dhanka ah Ruushka.

Turkiga ayaa taageera Ukraine, balse wuxuu ka soo horjeedaa cunaqabateynta Ruushka, inkasta oo uu sheegay inaan lagu jebin doonin dhulka Turkiga.

Ka sokow diyaaradaha F-16, Turkigu waxa uu sidoo kale danaynayaa dayuuradaha Eurofighter Typhoon ee Jarmalka, Britain iyo Spain, balse waxa uu ka cawday horusocod la'aan ka dhalatay diidmada Berlin.

Isniintii, Erdogan wuxuu New York kula kulmay ra'iisul wasaaraha Jarmalka Olaf Scholz, sida uu sheegay xafiiskiisa, isagoo intaas ku daray inuu u gudbiyay in Ankara ay diyaar u tahay inay horumariso iskaashiga dhinac walba iyo ka faa'iidaysiga fursadaha wadajirka ah ee faa'iidada u leh labada dhinac.

REUTERS

# MAREYKANKA OO CIIDAMO DHEERAAD AH U DIRAYA BARIGA DHEXE



Washington — Waaxda Difaaca Mareykanka ayaa Isniinti sheegtay, in tiro aanan badneyn oo ciidamo dheeraad ay u direyso Bariga Dhexe, xilli ay sii xoodeysaneyso xiisadda colaadeed ee mandiqadda ka taagan.

Go'aankaan ayaa kusoo beegmaya kaddib marki ay duqeymo cirka ah oo ay Isra'il ku garaacday Lubnaan ay ku dhinteen ku dhawaad 500 oo ruux. Weerarkaasi ayaa waxaa ka horreeyay duqeymo ay Axaddii labada dhinac is weydaarsadeen.

Maj. Gen. Pat Ryder, oo ah xoghayaha warfaafinta ee xarunta Pentagon-ka ee Wasaaradda Gaashaandhiga Mareykanka, ma uusan sheegin tirada ciidamada iyo waxa ay qaban doonaan.

Mareykanka ayaa waxaa horay Bariga Dhexe uga joogay ciidan gaaraya 40,000 oo askari.

# FRANSIISKA OO RIIXAYA XABBAD-JOOJIN DHEXMARTA ISRAEL IYO XIZBULLAH



Paris — Faransiiska ayaa Arbacadi sheegay in ay socdaan dadaallo lagu riixayo xabbad-joojin 21 maalin ah oo la kala dhexdhigayo Israel iyo Xizbullah, si loo qaboojiyo colaadda uu dhiigga badan ku daatay ee Lubnaan.

Wasiirka arrimaha dibadda Faransiiska Jean-Noel Barrot ayaa isaga oo ku sugan bannaanka hoolka shirarka ee Golaha Ammaanka wariyaasha u sheegay, in horumar mihiim ah laga gaaray saacadihi lasoo dhaafay arrinta xabbad-joojinta isla markaana ay wadahadalladu sii socon doonaan saacadaha soo socda.

Barrot, oo lagu wado in uu todobaadkaan gaaro Lubnaan, ayaa goor sii horreysay oo shalay aheyd u sheegay 15-ka xubin ee Golaha Ammaanka, in ay ka rajeynayaan labada dhinac in ay aqbalaan soo jeedinta xabbad-joojinta iyadoo aanan dib loo dhigin si loo dhowro dadka rayidka ah isla markaana la ogolaado billowga wadahadallo diblamaasiyadeed.

Israel ayaa sii wadday Arbacadi shalay duqeynta ay ka waddo Lubnaan.

Wasaaradda caafimaadka Lubnaan ayaa sheegtay in ugu yaraan 72 qof lagu dilay duqeymihi shalay, dhaawacyada ayay ku sheegtay wasaaradda ugu yaraan 223.

Wasiirka gaashaandhiga Isra'il ayaa isna Arbacadi u sheegay ciidamada Isra'il, suurtagalnimada weerar dhulka ah oo ay Israel ku qaaddo Lubnaan arrintaaso oo sii kordhisay cabsida laga qabo in ay sii baahdo colaadda Bariga Dhexe.

Mareykanka ayaa isna Arbacadi sheegay in isaga oo kaashanaya dowlado kale uu ka shaqeynayo sidii loo qabooji lahaa colaadda loogana hortagi lahaa in ay ku baahdo mandiqadda.

# GUUXA SHACABKA

## SIDEEN UGU GUDUBNAA QABIIL OO AAN U DHISNAA QARAN




Tan iyo markii 1960 xurnimada aan ka qaadanay gumeystihii reer-Yurub caqabadaha ugu waa weyn ee aan horay ugu socon weynay waxaa ka mida qabiilka.

Marka hore maxuu yahay qabiil? Maxayna ku kala duwan yihiin Qabiilka iyo Qabyaaladda?

Qabiil waa koox bulshada ka mid ah kuwaas oo wadaaga hal faraca ama kuwada abtirsado hal oday, qabiilka ma ahan ceeb ee waa wax lisku garto oo lisku xariiriyo, Allah subxaana wataacaalaa waxuu faray muslimiinta in ay xariiriyaan qaraabada oo aysan noqonin riximgooys ruuxa gooya qaraabda oo aan xariirinin qaraabada Allah ma barakeeyo umana naxariisto.

Qabyaaladda waa inaad sixun u isticmaasho qabiilka, qabyaaladdu waxey keentaa islaweynin iyo inaad is moodo inuu qabiilkaaga ka sareeyo qabiilada kale qabyaaladu waxey kugu riixaysaa inaad ku dhacdo dambi uu Allah kaa xarimay oo ah in aad qof maskiin oo aan waxba galabsanin aad u dhibaateyso magac qabiil.

Hadaba Soomaalidu waxay ka tagtay habkii wanagsanaa ee loo isticmaalaayey qabiilka taasi oo aheyd in lisku garto oo lisku xariiriyo balse taa badalkeeda waxaan ku dhaqanaa oo aan ku faanaa waxa loo yaqaano qabyaaladda.

Soomaliya marbey aheyd cudud aad u xoogan oo ka jirto geeska Africa lagana xushmeeyo gabi ahaanba caalamka, waxaana usoo dagaalanay oo aan madaxbanaani u soo hoynay qaar ka mid ah wadamada Africa, marbaa magac iyo qeymo ku dhaxlaheyn caalamka.

Maanta maheysanaa sharaftii iyo haybadii aynu lahaan jirnay?

Jawabtu waa maya, waxa naga qaaday sharafkii iyo karaamadii waxaa ugu weyn waa qabyaaladda oo naga burburisay qarankeenii iyo awoodeenii dowladnimo , qabyaaladdu waxey nadhigtay meel aad u liidato oo dunida inteeda kale tusaale inoo soo qataan.

Mudooyinkii dambbe rajada kaliya ee bulshda Soomaaliyeed ay qabtay waxaa ka mid ah in laga gudbay qabiilka iyo qabyaaladda loona gudbay Dowladnimo, balse mudooyinkii dambbe waxaa soo baxay hadallo iyo ficillo oo bulshdaSoomaaliyeed ku abuuray niyad jab, kaasi oo ay dabada ka riixayaan dowlado shasheeye iyo shaqsiyaad danaystayaal ah oo ka macaasha dhibka bulshada Soomaaliyeed.

Dhalinyarada Soomaaliyeed waxaa laga rabaa inay noqdaan horyaalka bulshada Soomaaliyeed iyo udub dhaxaadka nidaamka dowladnimo, dhalinyaradu waa inay iska fogeeyaan dadka doonaya inay dadtooda ku fshadaan, tusaale waxaa inoogu filan 30-kii sano ee dalkeenu bur-bursanaa waxaa awoodii dhalinyarada ka faa'ideystay qab-qablayaal dagaal oo ku fushaday danahooda gaar ka ah.

Maantana waxey doonayaan inay dib inoo celiyaan ka fakari maayaan horumarka oo uu dalkeenu hiigsanaayo, qabyaaladdu hadey faa'ido leedahay 30-kii sano ayaa faa'ido lagu gaari lahaa.

Intii aan dowlad la'aantu aheyn waxaa dayacmay qeyraadkeenii dabiiciga ahaa, qaar ka mid ah wadamada shasheeye ayaa si bilaash ah ku heli jiray qaar ka mid ah qeeraakeena dabiiciga ah sidoo kale waxaa qaar la watay iyo qaar nabaad guur ku dhacay noqday duur joogtii Soomaaliyeed.

Cadawga Soomaaliyeed markuu arkay in dalkeena uu san laheyn dowlad ilaaliso ayaa waxey dood galiyeen Badda Soomaaliyeed iyaga oo is dhahaayo ama ku haminaayo si fudud ayaad ku heli kartaan ama aad ku qaadan kartaan.

Hddi aan manta isku tashanin bari waxaa muran la galin doonaa qeyb ka mid ah dhulkeena waan soo aragnay dhibaata tada ay leedahay qabiilka iyo danaha gaar ka ah oo laga horumariyo danta guud.

Allah waxuu noogu deeqay dhul siman oo barwaaqeysan oo leh xeeb dharir keedu yahay 3333 oo ay ku jiraan qeyraadka nuucyadiisa kala duwan, waxaa nasiib daro ah in uu Allah subxaana watacaa inagu maneystay qeyraad intaas la eg balse aan ka baahanahay inagu.

Wadamada aan ka sugeyno macaawano waa wadamo buuraley ah oo buuraha korkooda ku abuuro dalag ka dib markii soo go'o inaga quudiyon, maanta waad aragtaan waxa ugu weyn ee uu caalamka inoogu hanjabo waaa deeqda aan idin siiyo Ayaan idinka jaranayaa .

In caalamku saas inoogu hanjabo ma ahan waxay iyagu na yeeleen ee waaa waxaa inagu is yeelnay, waxaa jirto maah-maah Soomaaliyeed oo dhaheyso ishiisa laga arkaa u shiisa lagu tumaa.

Markaan inagu isqeybinay oo aan awoodeenii kala dhantaalnay ayey caalamku inagu jeejeeseen, kuwa noogu hanjabaayo hadaadan saan sameyn deeqda aan idiin siiyo Ayaan idinka jaranayaa, wadamadooda keena kama dhaqaalo badna ee waxay heerkaas ku gaareen waa isku tashi iyo isku duubnaasho.

Hadaan is ku tashano oo aan abuurno kalsooni iyo wax wada qabsi waxaa hubaal ah inaa faqriga ka baxeyno oo aan gaareyno barwaaqo, aan mideyno xoogeena iyo maskaxdeena si aan ugu baxno gumeysiga ku dhisan dhaqaalaha.

Soomaalidu dhaxdeeda 30 sano ayey Dil,Dhac, Kufsi yo barakicin is ku heysay, manta waa maalintii aan ka toobad keeni laheyn oo Allah u laaban laheyn gacmahane is qabsan laheyn.

Nabad ku noolaasho horumar dhaqaale, horumar waxbarasho, wal-wal iyo cabsi la'aan oo aad ku noolaato iyo nolol wanaagsan waxaa kuu horseedi karo waa nidaam dowladnimo ee aan u midowno dhismaha dowladnimadeena.

WQ: Cumar Maxamed Cumar (Xuundey)

## RAJADEENNU WAA GAARISTA NOLOL QIIMO LEH



Maalin walba waxaad ku soo toostaa rajo iyo qorshe cusub oo la xiriira noloshaada xilliga aad habeenkii gogosha tagtana ka hor inta aadan seexan waxaad gashaa xisaabtan wixii maalintaa aad gaartay iyo waxa kuu dhiman aad weli tiigsaneyso.

Noloshu waa wax socda oo aan marna istaagin haddii aanu mowdku kuu iman maalin walba waxay leedahay guul iyo guuldarro marka la eego qorsheyaasha kuu degsan.

Noloshaada si ay u noqoto mid qiimo lah ku tiirso Rabbiga ku abuurtay kuna xirnow taas ayaana ka mid ah qaababka lagu gaaro guusha nolosha.

Qeyb ku yeelo gacansiinta dadka kaa liita waayo way ku farxad galineysaa in aad waxtarto qof dhibban qofka aad taageertayna waxay ku abuuraysaa yididiilo nololeed .

Waxaa Iyana nolosha qiimo u yeela tixgalinta dadka kale iyo dhageysigooda taasna waxay kuu keeneysaa in adna lagu tixgalliyo oo lagu dhageysto waayo qofka wanaagga ku dhex leh bulshada wuxuu helaa magac iyo aqoonsi iyadoo qofka bini'aadamka ah waxyaabaha uu tixgaliyo noloshiisa ay ugu weyn tahay in uu helo aqoonsi.

Nolosha qiimaheeda intaas kuma koobna laakiin waxay u baahan tahay isdhexgal in aad la yeelato dadka oo dhan ha yaraado ama ha weynaado, ha ahaado mid maskax ahaan fayow ama mid wax u dhiman yihiin, qofna ha dhibsan in aad xiriir la yeelato, qofna ha xaqirin , qofana hoos ha u eegin o dadka oo dhan isku qaab u arag oo soo wada dhawee.

Qiimaha nolosha waa farxadda ,noqo qof faraxsan xaalad kasta oo kula soo gudboonatana la qabso oo ha noqon qof laga dareemo marka uu dhib la soo gudboonaado oo weji kaduuda .

Nolosha qiimaheedu wuxuu ku jiraa in aad dhoolla caddeyn karto waayo dhoolacddeynta waa furaha guusha nolosha iyadoo qof walba inta uu qofka kale ka dhoollacddeyn badan yahay uu ka farxad badan yahay kana guul gaaris ogyahay waayo waxaa la yiraahdaa qofka aan dhoolla caddeyn Karin ma aha in uu ganacsi furto.

Qiimaha nolosha waa qoys waxaana loo baahan yahay rag iyo dumarba in uu qofku yeesho qoys waayo waayo caruurta qoyska ku biirta waxay abuurtaa farxad iyo rayn raynta nolosha .

Qiimaha nolosha waa in aad noqoto qof faham leh oo wax bartay waayo waxbarashada waxay qiimo u yeeshaa nolosha , qof aan aqoon laheyn dhaayo ma laha mana aha qof wax fahmaya oo nolosha qiimeyn kara .

WQ: Mohamed Hassan

## CIDDUU ILAAH GARGAAR LA DOONO CIDI UMA SOO TUUGO

Soomaaliya waxay soo martay xilliya kala duwan waa dowlad xadaari ah oo taqaanna dhib iyo dheefta, waa dal soo kifaaxay oo taariikh guun ah leh oo dunida laga yaqaanno

Xorriyadda soomaaliya kuma iman baryo iyo tuugmo ee wuxuu ku yimid halgan dheer iyo dagaal lala galay kuwii gumeysteyaasha ahaa ee Soomaaliweyn kala qoqobay ee shan u kala tuuray, sababta ay sida u yeeleenna waa in la xukumi waayay iyagoo wada jira markaas baa shan dowladood la kala siiyay

Soomaaliya waa soomaaliya waa dalka ku yaalla geeska afrika qaatay xorriyaddiisa si buuxda sannadkii 1960-kii ka dib markii laba ka mid ah ku midooday 1da luulyo halkaasoo ay ka dhalatay hal dowlo oo la yiraado Jamhuuriyadda Dimoqoraaddiga ah ee Soomaaliya.

Intaasi ka dib qarammada midoobay iyo dunida horumartayba waxay qalanka ku duugeen in soomaaliya tahay dal xor ah oo la xafidiyay Baddeeda iyo Birigeedaba waxaana laga ilaaliyay in xadgudub dambe lagu sameyn Karin lana mid tahay dowladaha caalamka

Itoobiya waa dowladda keliya ee gacan ku siisay in la qeybsado afrika, ilaa iyo haddana heysata qeyb ka mid ah dhulweynaha soomaaliya halka gumeystihii caddaanka ahaa uu xorriyad siiyay kuwii uu heystay, sidoo kalena NFD oo ah dhul Soomaaliyeed ay heysato Kenya, taasina waa muqaddas inay soomaaliya gacanteeda ku soo laabtaan xoog iyo xiilo middeey qaadataba.

Waa labada dal keliya ee naqa maqan oo ay xoog ku heystaan laba dal oo afrikaan ah waxaa la yiri oo ay soomaalidu ku Maahmaahdaa Baadi haddeey kugu raagto inaad leedahay baad moodaa, taasina waa riyo iyagana waa og yihiin inaysan lahayn.

Haddaba, waxaa soomaali tiraahadaa gudineey ima goyseen hadduusan gabalkey kugu jirin, itoobiya ma soo haweysateen baddeena haddeysan la shaqeyneynin kuwa lafta nagaa ah ee asalkoodaba aan leyska xaqiijin.

Si kastaba arrintu ha ahaatee soomaaliya waxay soo martay maalin ay ka sii nugleyd maanta oo ay aad u tabar yareed balse hadda waxaan dhihi karnaa Nin walboow taagtaa Nin walboow tabartaa, waxaana u maleynayaa inaad siran tahay.

Soomaaliya ma gabato markay runta gaarto balse way xishootaa oo xishmadda ayaa kala weyn wax kastoo dhaca, haddaad intaas garan weyday soo soco waa ninkey caano ka daataan.

WQ: Osman Dhiblaawe

# FAALLO & FALANQEYN

## QARANIMO MAXAA KA WEYN OO AAD RAADIN LAHEYD?



Madax meel ka sarreysa oo la salaaxo ma leh, ayey Soomaalidu ku maahmaahdaa waxaana taa la mid ah qofka wax kasta oo uu heysto xorriyadiisa iyo qaranimadiisa wax uga qaalisan ma jiro.

Wax kasta oo dunida yaalla haddii hesho oo gacantaada la galiyo laakiin aadan heli Karin qaran aad leedahay, dal iyo dad aad ka tirsan tahay waxba kuma tareyso waxaas aad heystao waxaadna noqoneysaa qof meel ka curyaansan oo wax ka maqan yihiin.

Dalkaada adigaa leh ,,adigaa leh adigaana u baahan oo raadinaya in aad la mid noqoto ummadaha kale ee xorriyaddooda iyo qarankooda ku raaxeysanaya.

Qaran laawe wuxuu noqdaa qaxooti hadba dal isu dhiiba oo dowlad la'aantiisa lagu yaso oo aan helin waxa dadka kale heysto ee uu ku naaloonayo.

Dalka wuxuu doonayaa in qaranimadiisa la ilaaliyo lana koolkooliyo xornimada uu heysto lagana dhowro cadowga shisheeyaha lagana difaaco mase doonayo in danaha qaranka iyo sirtiisa faraha loo galiyo shisheeye aan ka naxeyn ee ku raaxeysanaya dhibka dadka , dalkaaga iyo qarankaaga soo gaaraya.

Ma aha qaranka in loola shirkoobo kuwo shisheeye ah ama ay lug ku yeeshaan aaya ka talintiisa waayo shisheeye dan kuuma hayo in uu ku lug gooyo mooye .

Guusha qaranka waxay ku jirtaa isla jirka dadkiisa iyo midnimadiisa, waxay ku jirtaa in laga wada laxowsado dhibka qaranka ka soo gaaraya siyaasadaha gurracan ee shisheeyuhu laayahay waxay ku jirtaa in ummadda qarankaas leh ay ka wada shaqeeyaan wanaagiisa iyo marna in aan la kala furfuran .

Qaranka waa in dhiigga loo huraa oo lagala safan dano shisheeye waa in la xoojiyaa rukumada uu qaranku ku taagan yahay oo aan marna dadkiisu ku fekerin wax shisheeyaha danta u ah oo ah kala furfuranka iyo is diidka.

Qaranka waa in loo shaqeeyaa oo lagu dadaalaa in uu hore u socdo oo aan loo celin laguna fekerin in loo laabto dhabbe xun oo lagu soo gubtay laguna halaagmay oo la soo maray.

Qaranka iyo dowladnimada hore ha loo hinjiyo ha la horumariyo ee yaan lagu fekerin dib u dhac iyadoo laga fekerayo dano qabyaaladeed iyo kuwo gaar ah oo burbur horseedi kara.

WQ: Maxamed Cismaan

Madax meel ka sarreysa oo la salaaxo ma leh, ayey Soomaalidu ku maahmaahdaa waxaana taa la mid ah qofka wax kasta oo uu heysto xorriyadiisa iyo qaranimadiisa wax uga qaalisan ma jiro.

Wax kasta oo dunida yaalla haddii hesho oo gacantaada la galiyo laakiin aadan heli Karin qaran aad leedahay, dal iyo dad aad ka tirsan tahay waxba kuma tareyso waxaas aad heystao waxaadna noqoneysaa qof meel ka curyaansan oo wax ka maqan yihiin.

Dalkaada adigaa leh ,,adigaa leh adigaana u baahan oo raadinaya in aad la mid noqoto ummadaha kale ee xorriyaddooda iyo qarankooda ku raaxeysanaya.

Qaran laawe wuxuu noqdaa qaxooti hadba dal isu dhiiba oo dowlad la'aantiisa lagu yaso oo aan helin waxa dadka kale heysto ee uu ku naaloonayo.

Dalka wuxuu doonayaa in qaranimadiisa la ilaaliyo lana koolkooliyo xornimada uu heysto lagana dhowro cadowga shisheeyaha lagana difaaco mase doonayo in danaha qaranka iyo sirtiisa faraha loo galiyo shisheeye aan ka naxeyn ee ku raaxeysanaya dhibka dadka , dalkaaga iyo qarankaaga soo gaaraya.

Ma aha qaranka in loola shirkoobo kuwo shisheeye ah ama ay lug ku yeeshaan aaya ka talintiisa waayo shisheeye dan kuuma hayo in uu ku lug gooyo mooye .

Guusha qaranka waxay ku jirtaa isla jirka dadkiisa iyo midnimadiisa, waxay ku jirtaa in laga wada laxowsado dhibka qaranka ka soo gaaraya siyaasadaha gurracan ee shisheeyuhu laayahay waxay ku jirtaa in ummadda qarankaas leh ay ka wada shaqeeyaan wanaagiisa iyo marna in aan la kala furfuran .

Qaranka waa in dhiigga loo huraa oo lagala safan dano shisheeye waa in la xoojiyaa rukumada uu qaranku ku taagan yahay oo aan marna dadkiisu ku fekerin wax shisheeyaha danta u ah oo ah kala furfuranka iyo is diidka.

Qaranka waa in loo shaqeeyaa oo lagu dadaalaa in uu hore u socdo oo aan loo celin laguna fekerin in loo laabto dhabbe xun oo lagu soo gubtay laguna halaagmay oo la soo maray.

Qaranka iyo dowladnimada hore ha loo hinjiyo ha la horumariyo ee yaan lagu fekerin dib u dhac iyadoo laga fekerayo dano qabyaaladeed iyo kuwo gaar ah oo burbur horseedi kara.

WQ: Maxamed Cismaan

## MAANDEEQ MAXAA LOO GOWRACAYAA?



Magaca Maandeeq marka lagu dhawaaqo xusuus badan ayuu leeyahay , dadka qaar waxay xasuusanayaan hashii maandeeq ee madiidada aheyd ee geela ugu caano badneyd looguna magac daray tii maanka deeqday.

Marka la yiraahdo xagga siyaasadda waxaa loogu magacdaray xilligii xorriyadda hashaa la yiraahdo Maandeeq iyada oo looga faa'iideynayo xasuusta gumeysiga iyo dhibtiisii loona dabaaldegayo farxadda xoriyadda iyo madaxbannaanida Ilaah uu siiyey ummadda soomaaliyeed, halgankoodina uu noqday mid miro dhalay si hiigsi iyo muuqaal la taaban karo u noqdaan.

Waxay dardaaran ka bixiyeen waddaniyintii iyo siyaasiyiintii Hasha Maandeeq in aan la gowricin maadaama naasaheeda irmaanka ah caano noogu deeqaan in laga ilaaliyo gumeysiga iyo cadowga iyo kuwa shisheeye kalkaalka ah oo laga yaabo in ay caloosha ka soo ridaan ama ay gowracaan sida kuwa haatanba maamula gobolka Waqooyi Galbeed usoo xambaaranayaan gumeysiga Xabashida.

In xorriyadda la adkeeyo asaaskeeda iyo dhismaha guud laakiin waxaa caado u noqotay soomaalida qaar wax lala yaabana ah mar kasta oo la doonayo in wax la dhiso oo lagu jiro abaabul iyo isku xir meeshii aan wanaaagga gacan siin laheyn maamul dhisidda waddanka gudihiisa in ay qaar soo weeraraan degmooyinka qaar iyagoo sheeganaya in ay iyagu leeyihiin welibana ku dhasheen halkaas oo ay ka baabulaan dagaallo qax iyo kala carar.

Waxaa wax lala yaabo ah in dadka muslimka ah ee aad qaraabada iyo ehelka tihiin la gu dhibaateeyo siyaasad meel kale laga soo xawilay ama laga soo minguuriyay iyo damac gaara ah , degmooyinkaas oo ay ku nool yihiin dad maato ah iyo kuwo tabar yar.

Waxaa wax laga xumaado ah in la galiyo qax iyo dagaal iyadoo la eegayo dano gaara iyo siyaasado is diidan, sida badan degmooyinka ay ka dhacaan dagaallada waxay noqdaan kuwo dib u dhac uu yimaado, ma qaataan qoondada ay ku leeyihiin maamulka ay hoos tagaan kama faa'iideystaan nabadda iyo horumarka meeshaas laga rabo.

Soomaalida waxay ku mahmaahdaa cir marka uu da'ayo ayaa la doogtaa haddii aadan maanta ka faa'ideysan abaabulka loogu jiro waxqaybsiga iyo maamul u dhisidda gobollada qaar ka xorowbay gacan ku heynta iyo kuwa ay ka jiraan colaaaha kama qeyb galaan wax qeybsiga iyo horumarka dalka ka socda .

Haddaba, haddii aad maanta aad isku aafeyso guluf been ah iyo siyaasado is diidan ma maali kartid hasheenna maandeeq, waxna kama heleysid.

Waayo waxaadba dooneysaan inaad gowracdaan hashii la wada lahaa, calankeena, ciiddeenana iyo wada noolaanshaheenna waa wax u baahan iskaashi nabad iyo walaalnimo.

Sidoo kale, haddii aan la sugin amniga hasha maandeeq oo aan laga ilaalin bahalka dilaya waa gunnimo, Hashu cadow badan ayeey leedahay waxayna cillad iyo dhibaato ka abuuri kartaa qeybta aad ka joogto waardiyaheeda gaar ahaan marka cadowga kuugu soo dhiibo waran, toorey ama billaawe af badan ee aad ka disho Meeshii lagaa filayay in aad amnigeeda sugto markaas waxaad ku sifoobeysaa qaa'inul waddan.

Sidaa darted, maandeeq hasheennii ha gowricin , qarankana meel howga dhicina kuwa gumeysiga dabada kusoo xirtoow.

WQ: Abwaan C/salaam Gabayre

## DHOWRISTA DEGAANKA WAA MID LOO BAAHAN YAHAY

Marka la eego sida loogu baahan yahay dhowrista degaanka iyo dhirta waa mid uusan ka maarmin noolaha oo dhan oo ku tiirsan dhirta .

Waxtarka geeduhu waa mid aad u sarreysa marka aan ka soo qaadno sida loogu isticmaalo nolosha adduunka waxaa laga helaa faa'idooyin isugu jira in la harsado oo cadceedda laga harsado, dugsi laga dhigto marka ay dabeylo kacaan.

Meeliba Meesha ay ka geedo badan tahay waa ka nimco iyo barwaaqo badan tahay waxaana laga helaa dhismaha gutyaha laga dhisto , daaqa xoolaha ay daaqaan si cad iyo caano looga helo, miraha laga gurto geedaha laftooda iyo dabka oo laga soo saaro siiba nooca madagta loo yaqaano.


Meeshii geeduhu ku yaallaan oo dhirtu ku badan tahay xilliga xagaayaha iyo roobabka dabaylo kama kacaan, eeliba Meesha ay ka deegaan wanaagsan tahay wey ka nolol wanaagsan tahay.

Dadka reer guuraaga ah waxay ku ootaan guryaha iyo xoolaha si aan dugaagu ugu soo dhicin waxaana harsada dadka, xoolaha iyo duurjoogta waxayna ka helaan nolol wanaagsan.

Xooluhu wey ku naaxaan Meesha degaankeedu marka uu roobsato xooluhu aad ayey ugu cayilaan waxaana laga helaa waxyaabo kale oo lagu nafciyo , xoolihii oo caano iyo subag badan laga helo iyo dadka oo aad ugu noolaada.

Degaanku waa mid aad faa'iido u leh marka la ilaaiyo , dad ayaase jira nabaadguur ku sameeya degaanka taasina ma aha arrin wanaagsan ee waxaa wanaagsan in loo ilaaliyo degaanka sida loo ilaaliyo xoolaha iyo beeraha sababtoo ah haddii aan geedo jirin lama helayo daaq wanaagsan iyo dhul bacrin ah waxaana dhulka ka soo saara macdanta iyo kheyraadka aadka u faraha badan waa geedaha iyo roobka , dhirtaas oo ah mid noocyo fara badan u kala baxda .

Qaar waxaa laga goostaa tiirarka guryaha lagu dhisto, alwaaxda iyo looxaanta kuwa laga sameeyo ,



Xagga magaalada waxay faa'ido u leedahay dugsiga degaanka si aysan dabaylo uga dhicin, xoolaha oo marka ya soo daaqan lagahelo caano iyo hilib , dhuxusha iyo dhamaan tiirarka lagu dhiso guryaha carshaanta ah.

Xagga miyiga waxay ka helaan marka ay dhirtu barwaaqowdo xoolaha ayaa ku naaxa daaqa , xeryaha ayaa lagu oodaa si aan bahalku u cunin , beeraha ayaa iyagana lagu oodaa si aan duurjoogta iyo xooluhu u cunin.

Tiirarka iyo dhigaha aqlalada ayaa la sameeyaa, meyraxdana waa laga diirtaa.

Si kastaba ha noqotee, geeduhu waa kuwa ugu nafciga badana adduunka waxaana dhibaato in dhirta la jaro ama la gubo oo la xaalufiyo degaanka.

Miyi iyo magaalaba waa kuwo aan laga maarmin oo ay si weyn ugu tiirsan tahay nolosha aadanaha waana in la ilaaliyo dhirta maadaama ay leedahay faa'idooyinkaas waaweyn ee aan soo sheegnay.

WQ: Abwaan C/salaam Gabayre

# ISLAAMKA IYO NOLOSHA

## SUNNADA ISLAAMKA



Sunnadu waa shuruuc iyo qawaaniin mabda'ysan, iyo sida nebiga (SCW) u wajjihi jiray waxyiga iyo awaamiirta illaahiga ah ee Eebbe wayne nebigiisa ku soo dejinayay.

Siirada:

Siiradu waa tagtaddii iyo taariikhdii nebigeena suuban naxariis iyo nabadgalyo korkoosa ha ahaatee. Siirada waxa ku sugan cibaaro iyo cajab. Waxa ay ka warramaysaa dagaaladii nebiga iyo waxyaabihii nebigu usoo joogay.

Tafsiir iyo Ta'wiil:

Tafsiirku waa fasiraaddii iyo qaada dhiggii qura'anka kariimka ah. ta'wiil oo iyaduna ah fasiraadda axaaddiista, isku geyn waa fasiraaddii kitaabka qur'aanka kariimka iyo axaaddiista nebiga (SCW), oo la isku geeyay.

Maddaariistii Shareecada iyo madhabtooda

Dhammaadkii qarnigii 8-aad, waxa soo if-baxay afar maddarasaddood oo tafatir iyo taxliil ku sameeya Shareecada Islaamka. Labadii ugu muhiimsanaa waxa ay kala ahaayeen (Shaafici) iyo (Xannafi) . Xannafiyada waa maddarasaddii u horraysay ee la abuuray. Waxa abuuray Caalimkii weynaa ee reer Ciraaq (Abu Xaniifa) (700-767). Xannafiyada waxa laga haystaa waddamada kala ah: Hindiya, Pakistan, Bangladesh,Turkey, Afghanistan, iyo badhtamaha Eeshiya.

Shaaficiyaddana waxa yagleelay Caalimkii reer Makka ee Imaam Al Shaafici (767-820). Shaaficiyadda waddamada haysta waxa ka mid ah: Masar, Indonesia, Bariga Afrika, Soomaaliya, iyo Suuriya. Maddaahibta kale ee iyaguna jiray waxa ka mid ahaa Xannaabilada oo uu sameeyay (Imaam Axmed ibnu Al-Xanbal (780-855).


Ibnu Xanbal waxa uu aaminsanaa in xaqiiqooyinka biyo-kama-dhibcaanka ahi ay ku soo arooreen Qura'aanka, Quraankuna yahay meesha loo noqonayo markasta. Xannaabilada dhulalka aadka looga haysto waxa ka mid ah: Galbeedka iyo waqooyiga Afrika. Madhabta afaraad waa madhabtii labaad ee la aasaaso oo uu dhidibada u taagay Imaamkii weynaa ee Imaam Al-Maalik Ibnu Anas (715-95). Maalikiyada waxa laga haystaa Sacuudi Carabiya iyo waqooyiga Nayjeeriya. Dhammaantood Eebbe haka raali noqdee. Khilaafaadka mabaadi'ida iyo waxyaabaha la iskaga horyimaado waxa lagu xallin jiray nooc loo yaqaano (Ijmaac) oo ah kulanka culimada faddilan oo arrinta la isku mariwaaya ka fatwooda, kaddibna go'aan kama dambays ah soo saara.

Qaaddiyada, Muftiga iyo Fatwada

Qaaddiyadu waa waddaadada maxkamaddaha, waa culimada gacanta iyo hoggaanka u haya maxkamadaha Islaamiga ah. Waa culimada u xil-saaran qeybinta dhaxalka iyo hantida loo kala qeybiyo dhaxalka dadka doonaya. Markale culimadani mararka qaarkood masaajiddada ayay khudbado iyo wacdiyo ka galaan. Muftigu waa xeeldheere iyo culimo sharaf badan oo ka faalloota ummuuraha Islaamka iyo wadcigooda.

WD: Ibraahim Warsame

## SHAREECADA ISLAAMKU WAXAY DHADHAN U YEESHAA NOLOSHA DHOW IYO MIDDA DHEER



Shareecada Islaamku waa laba weedhood oo la isku geeyay, kuwaas oo macnahoodu kala yahay Sharci ama (Law), si kale haddii loo dhigno waa awr lagu hoggaamiyay Goobtii uu biyaha ka cabi lahaa. Waa shuruuc iyo axkaam laga soo qaatay Kitaabka Qur'aanka Kariimka ah.

Islaamka dadku waxa uu faraa sida loo tukado, sakada loo bixiyo, sida loo soomo iyo dhammaan acmaasha kale ee wanaagsan ee in aan sameyno nalaga rabo si aan ajar iyo xasanaad uga helno. Sidoo kale Sareecada Islaamka, waxa ay ina fartaa qaabka iyo nooca labbiska aynu qaaddanayno iyo sida salaanta la isku wayddaarsanayo. Shareecadu dhaanteedba waa hannaan iyo nidaam ku toosiya dadka raacsan qaab-dhismeedka nolosha iyo toosinta togan iyo hirgelinta akhlaaq iyo dhaqan suubban.

Shareecadu waxa ay wax weyn ka tartaa hannaanka guurka, furitaaanka iyo weliba dhaxalka. Iyada oo shareecadu sidaas tahay ayay haddana waddamo badan oo Islaam ahi uguma dhaqmaan si dhameystiran, oo waxa ay sameysteen hannaankooda u gaarka ah. Shareecadu waxa ay bayaamisay hannaanka dawladnimad suubban iyo garsoorka. Haddii khilaaf ama isqabad yimaado, waxa aad loo tixgeliyaa tan Shareecada waayo Islaamku mar walba waa xalka kama dambeyska ah muslimiinta dhexdooda wax walbana asigay ku dhanyihiin.

Shareecada waxa loo qaybiyaa Xalaal iyo Xaaraam.Shareecada Islaamku waxa ay leedahay qawaaniin lagu qaado qofkii ka horyimaadda ama jebiya. Qolyaha reer galbeedku marka ay dhalliilayaan Shareecada, waxa ay soo qaataan tuugga gacmaha la jarayo, ciqaabaha kala duwan ee la mariyo ruuxa ka horyimaadda Shareecada, qofka isaga oo Islaam ah ee diinta ka baxa in dil lagu fulin karo. Iyo qisaasta lagu fuliyo ruuxa ruux kale u dila si ula kac ah. Waxa ay yiraahdaan in ciqaabahan kala duwani ka hor imanayaan xeerka caalamiga ah ee xuquuqal insaanka. (International norms of Human rights).

Shuruucda iyo Qawaaniinta Islaamku raaco waxa ka mid ah:

Axaaddiista:

Axaaddiistu waa hadalladii iyo ficilladii Nebigeenna suuban naxariis iyo nabadgaliyo korkiisa ha ahaatee, oo la soo ururiyay. Inkasta oo axaaddiista qaarkood aanay wada sax ahayn, oo ay jiraan axaaddiis faro badan oo nebiga la ga sameeyey lagana been abuurtay, ayaa haddana waxa la sheegaa 170,000 oo hadal oo nebiga laga soo weriyay.

Tusaale, Axaaddiista qaarkood ayaa ka mamnuucaya dumarka in ay keligood safraan, iyaga oon wadan Muxram. Isla xaddiiskan iyaga oo soo qaadanaya ayay Carabtu usoo daliishadeen in aanay gabadhu gaadhi kaxayn karin Sacuudi Carabiya dhexdeeda.


Axaaddiista nebigu way kala culus yihiin, kuwa muhiimadda badan la siiyo waa kuwa oraah ahaan looga hayo nebiga. Waxa laga soo weriyay intii u dhaxeysay qarniyadii Hijriga 8 illaa 10-naad.

Xaddiisyada ugu badan waxa ururiyay Imaam Bukhaari (810-70) iyo Muslim Bin Hajjaaj (817-75). Waana kuwa ugu kalsoonida badan inta la ga hayo xaddiisyo nebiga. Shuruucda iyo qawaaniinta shareecada ee ku soo arooray Quraanka waxa ay Qur'aanka ka yihiin 500 oo Aayaddood, ama waxa kitaab ka Qur'aanka Kariimka ah ka yihiin 16%.

Islaamku waxa ay rummaysan yihiin in dhammaan mabaadi'ida iyo shuruucda Islaamka u dejisan ay ku soo arooreen Qur'aanka kariimka. Tusaale, In sakada la bixiyo Qur'aanka ayaa inna faraya; laakiin xaddiga iyo qadarka la bixinayo, waxa lagaga warramay axaaddiista iyo aqwaasha nebiga laga hayo.

WD: Ibraahim Warsame

## FATWADA



Fatwadu waa qawlka culimada ee raajixa ah waa hadal culimada indheer-garadka ah ka soo saaraan ama kaga fatwoodaan xaalad dadka haysata, oo loo baahan yahay in culimadu ka fatwoodaan. Fatwooyinka qaar lama qaadan karo, oo waxa ay dhiirigeliyaan in dad aan waxba galabsan lagu jihaado, kuwaasina waa ku dhalay in ururo iyo isbahaysiyo jihaad doon ah abuurmaan – siiba dhulka Soomaalida – oo maanta la ciirciiraya fatwooyin Shuyuukh kala duwan.

Tusaale waxa kuugu filan Fatwada uu sameeyo Sheekh Al-Azharka Masar, inkasta oo dadka qaar ku dhalliilaan in ay gudbiyaan oo soo xambaaraan aragtiyadaha dawladda dalka Masar. Haddana fatwadaas waa mid laga qaddariyo dhulweynaha Islaamka.

Xannafiyadu waa ay rummaysan tahay in ruuxa xatooyo sameeya, lacagtii iyo hantidii uu dhacay dib looga bixiyo. Halka culimo badan oo Islaam ahi qabaan in xeerka ciqaabta ee dhigaya in gacanta la gooyo la ga tannaasulo oo ciqaabta la mariyo keliyaata ummuuraha iyo cases-ka waaweyn ee dhiilada wata.

Sababta oo ah bay yidhaahdeen aayadda Qur'aanka Kariimka ah ee ka hadlaysa xattooyada gacanta la goynayo; waxa ku xigta aayad kale oo tilmaamaysa raxmadda iyo cafiska Eebbe, in Eebbe korreeye awoodo in uu cafiyo ruuxa khaldama ee gef ku dhaca.

Haddii aynu ku yara nasano gacanta la goynayo,tusaale, waddamada dadka gacanta la jaro way isku maandhaafsan yihiin halka laga goynayo gacanta. Sunnigu waxa ay rummaysan yihiin in laga jaro gacanta hore. Halka Shiicadu aaminsan tahay in ruuxa laga jaro faraha hore oo keliyaata.

Islaamku waa diin sharaf iyo cizi u sugnaatay, waxa uu xarrimay dhammaan gabood fallada kala duwan iyo xattooyada. Islaamku sidoo kale waxa uu qeexay in gacanta midig wax lagu cuno. Nasiib-darradu-se waxa ay tahay gacanta midig waa gacanta la jaro, haddii qofku sameeyo tuugnimo. tusaale, dalka Afghanistan, xilligii ay ka talinayeen ururka Taliban, ayaa waxa ay soo rogeen xeer dhigaya in lugaha iyo gacmaha la jari karo ruuxii tuuggo ku kaca.

Islaamku waa diin illaalisa, dadkana farta awaamiir ku saleysan khulqiga iyo dhaqanka wannaagsan. Nebigeena Suuban, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee, markii la soo diray, waxa uu yiri: Waxa aan u imi si aan u dhammaystiro makaarimta akhlaaqda. Sidaa daraaddeed waxa ay ku tusinaysaa sida Islaamku u dhawray dhaqanka wannaagsan.

Diinta Islaamka oo laga baxaa waa denbiga ugu wayn ee diinta Islaamka laga galo. Waa fal danbiyeed cad oo ruuxii diinta ka baxa ay ku waajibtay ganaax culus.

Xeerka dhigaya in la dilo ruuxii ka baxa diinta Islaamka waa sharci u dagsan waddamo badan oo Islaam ah. Sida Sacuudi Carabiya, Iiraan, Pakistan, iyo Masar. Inkasta oo ay yartahay dadka lagu fuliyo sharcigan oo kale.

WD: Ibraahim Warsame

# ARRIMAHA BULSHADA

## WARGEYSKA DALKA WAA U ADEEGAHA BULSHADA SOOMAALIYEED



Wargeyska Dalka oo ka mid ah hay'adaha Warbaahineed ee Dalka islamarkaana hoostagta Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Dalxiiska Soomaaliya, waxaa uu soo maray maraaxil kala-geddisan laga soo bilaabo xilliyadii gumeysiga isagoo yeeshay magacyo kala duwan, siiba beri samaadkii oo loo oran jiray Xiddigta Oktoober ilaa maantadan la joogo.

Haddaba iyadoo laga duuliyo qorshaha horumarinta baahiyaha wargeyska ay bulshada u qabto ayaa lagu guuleystay in uu ka gudbo Muqdisho lana gaarsiyay qeybo ka mid ah gobollada dalka Soomaaliya, iyadoo dadka ku safraya garoonka diyaaradaha Aadan Cade ay bilaabeen in wargeysku ay ku dhex akhristaan diyaaradaha dhexdooda iyo xafiisyada Garoonka.

Maamulka Wargeyska Dalka ayaa ku amaanay wariye Maxamed Nuur Macalin Johans, Absuge iyo C/casiis Ciroole oo kaalin ka qaatay gaarsiinta nuqullada wargeyska Garoonka Diyaaradaha Muqdisho iyo goobo kale.

In kastoo hadal iyo qoraal aan ku soo koobi Karin marxaladihii uu soo maray iyo muhiimadda uu u leeyahay xog gaarsiinta bulshada, ayaa haddana maqaalkan waxaan ku soo koobaynaa isbeddellada iyo horumarrada lagu soo kordhiyay adeegyada Wargeyska uu uhayo bulshada Soomaaliyeed.

Ka dib qiimeeyn la sameeyey ayaa muujinaysa in Wargeyska dalka uu qaaday tallaabooyin is daba joog ah oo horumar leh.

Sidoo kale, toddobaadkan iyo wixii ka dambeeyaba waxaa wargeysku la soo bixi doonaa dardar cusub, taasoo ay shacabkuna ku diirsan doonaan isla markaana ay bulshadu Dhanka aad u danayso akhriskiisa iyo in dowr ay ku yeesheen qeybaha bulshada sida shirkadaha ganacsi, kuwa duulimaadyada iyo inta badan dadka isugu yimaada goobaha lagu qaxweeyo ee magaalada Muqdisho.

Wargeyska wuxuu leeyahay laba qeybood oo kala ah maalinle qadka aad ka heli karto Online Dalka Journal ama Todobaadle oo loo qeybinayo bulshada, isagoo soo koobaya macluumaad kasta oo nolosha taabanaya, sida Siyaasadda, Dhaqaalaha, Ammaanka, Ganacsiga, Arrimaha bulshada, Diinta, Ciyaaraha iyo Faafinta Rasmiga ah ee dhanka dowladda iyo kuwo kale.

Xarumaha dowladda, iyo goobaha dadweynaha isugu yimaadaan ee magaalada Muqdisho, sida Hoteellada, Baararka iyo meelaha kale waxaa aad looga akhristaa Wargeyska dalka, taasi oo muujinaysaa in muddooyinkii ugu dambeeyey uu horumar iyo saameyn yeeshay Wargeyska, in kastoo weli ay dadaallo socdaan.

Fursadaha bulshada ay ka heli karaan Wargeyska Dalka Waxaa ka mid ah in lagu soo bandhigo afkaaro iyo macluumaad ay danaynayaan, soo bandhigista horumarka ganacsiga oo dhan kasta leh sida shirkadaha iyo howlaha maalgashi ee dalka ka socda.

Ugu dambeyn Wargeyska Dalka wuxuu muwaadin kuu hayaa fursad aad ku soo bandhigi karto afkaartaada.

Haddaba haddii ay jiraan macluumaadyo muhiim ah oo mudan in bulshada loo faahfaahiyo, la soo wadaag qeybta xiriirka Wargeyska si aragtidaada aad ugu soo bandhigto halkani.

WQ: Osman Dhiblaawe

## QALABKA ISKU XIRKA BULSHADA IYO SAAMEYNTA TAHRIIBKA

Muddo haatan laga joogo 40 sano ayuu qalabka isku xirka bulshada (Social Media ku soo biiray caalamka waxaana emailkii ugu horreeyey la is weydaarsaday 1971kii iyadoo qalabkan oo ay ku jiraan Facebook , Twiter iyo isgaarsiinta kale sida telefoonnada thuraya-ha ay la yimaadeen horumar dhnaca isku xirka .

Qalabkan ayaa haatan afartii qofba qof uu caalamka adeegsadaa iyadoo loo heysto mid aan dhib laheyn balse cilmi baareyaasha ayaa sheegaya in ay leeyihhin dhinac taban oo saameyn ku yeeelan kara qofka maskax ahaan iyo dabeecad ahaan.

Daraasad la sameeyey 2012kii oo ay sameysay jaamacadda Lehigh ee ku taalla gobolka Pennsylvania ee dalka Mareykanka waxaa lagu ogaaday in ay shucuurta qofka samayen waxayna dadkii lagu tijaabiyey darasadda ka soo baxday oo ahaa Mareykan 15% ay qalabkani dabeecadooda bedeleen halka 51% laga ogaaday in saameyn xun ay ku yeesheen.

Hadaba dadka Soomaalida ah siiba dhallinyarada ayaa qalabkan adeegsada waxayna dhallinyaradu muddooyinakan dambe diiradooda saaraan safarada tahriika iyo wax ka ogaanshaha nolosha qurbaha ,,,

Qalabka teknolojiyada cusub oo ay ku jiraan isgaarsiinta casriga ah iyo kuwa baraha bulshada sidee loola xiriirin karaa tahriibka dhallinyarada Somaalida .



Xamsa Maxamed Shiikhdoon oo ku nool magaalada Hargeysa wuxuu daraaseeyaa saameynta baraha bulshada iyo isgaarsiinta ay ku leeyihiin tahriibka dhallinyarada wuxuuna sheegay in sababaha dhallinyaradu ay ugu hanqal taagaan tahriibka ay qalabkani ku hoggaamiyaan.

" Dhallinyarada dalka ka tahriibtay ee tagtay dalalka kale waxay sawiradooda oo ay isaga soo qaadeen meelo qurxoon ayey soo dhigaan baraha bulshada ,, waxayna saameeyaan dhallinyaradii gudaha dalka ku nooleyd iyagoo isu ekeysiinaya dad barwaaqo ku hoortay ..”ayuu yiri Xamsa

Sadaam Maxamed Axmed waa aqoonyahan bartay sharciga aqoona u leh saxaafadda wuxuu qabaa in qalabkan isku xirka bulshada uu caalamka ku yeeshay saameyn kala duwan oo isugu jirta mid xun iyo mid wanaagsan

“Baraha bulshadu waxay sahleen isku xirka dadka iyo iska warqabkooda laakiin dhinaca tahriibka dhallinyarada waxay abuureen hiyi-kac ..iyo in dhallintii Afrika oo ay ku jiraan kuwa Soomaalida ay dalkoodii ka jeclaadaan dal aaney aqoon oo aney ogeyn waxa ay ka heli karaan” ayuu yiri Sadaam.

Isgaarsiinta ama qalabkani saameyntiisa kuma koobna xiriiradaa hase yeeshee waxay kaalin ku leedahay abaabulka safarada tahriibka ee kooxo dhallinyaro ah oo isku xirma inta badanna isticmaala isku xirka isgaarsiinta telefoonka si ay isugu abaabulaan safaradaa iyadoo qaarkood ka qarinaya waalidiinta sida uu sheegayo Xamsa Cali Shiikhdoon.

‘’Akhbaarta safarka waxay ku kala qaataan dhallinyarada baraha ay ku jiraan Facebook oo ay iska abaabulaan ,waxayna isku dhaafsadaan macluumaadka”ayuu yiri

Waalidiinta ayaa ku kala qeybsan safarada tahriibka dhallinyarada oo qaarna ku taargeeraan qaarna ka horjeestaan hase yeeshee marka safaradani bilowdaan ayaa hadana isgaarsiintan casrigan ah hadana kaalin ku yeelataa xiriirka waalidka, dhallinyarada tahriibtay iyo kooxo safarada abaabula oo sheegta lacago wuxuuna Cali Cabdi oo Muqisho ku nool xirriiro isgaarsiineeeed oo ay ilaa haatan la soo sameeyan kooxo ku sugan Liibiya oo heysta walaalkiis lacagta safarkana ku sheeganaya.

“Telefoonada waa meesha laga soo waco waalidiinta marka carruurtooda ay ku dhacaan dabinka kuwa wax tahriibiya oo telefoonada ku muujiya handadaad” . ayuuna yiri.

Mararka qaar sheegashada kooxahaasi aad bey u dhibtaa waalidinnta oo qaarkood aaney heli karin lacag ay carruurtooda oo loogu hanjabayo in la dilayo ama ama iyagoo la ciqaabayo isgaarss inta loogu so gudbinayo aaney furan karin wuxuuna adeegsiga isgaarsiintan u arkaa C/naasir Aadan mid xoogaa wanaag leh oo qofkaa la heysto u keeni karta in uu badbaado helo wuxuuse ka horjeedaa in marka horeba la galo falkaa isbiimeynta ah.

“Mararka qaar hanjabadaadaha waxaa ku jira jir dil telefoonka toos looga maqlo ..taas oo ah calool xumo” sida uu sheegay .

Qalabkan isku xirka bulshada marka dhinaca kale laga eego waxaa lagu soo gudbiyaa dhibaatada tahriibka iyo tahriibayaal boqlaal ah oo badaha ku qarqamay iyo muuqaalo naxdin leh oo ku saabsan doonyo degay iyo tahriibeyaal ku baaba;ay hadana saacad walba iyo maalin walba dhallinyaradu qatartaa wey ku sii socdaan , waxyana dadku ka fekeraan su'aal ah maxay dhallintu ugu sii dhegan yihiin arrinta, wuxuuna Xamza Cali shiikhdon ka hadlayaa sababaha ku kallifaya dhallinta in aaney ka tanasuleyn safaradan.

“ Wey adag tahay in dhallintu ka tanaasulaan laakiin waxay u baahan tahay in loo helo fursado waxbarasho shaqooyin iyo in kor loo qaado mooraalka dhallinyarada” ayuu yir Xamza.

WQ: Mohamed Hassan

SONN

# QUBANAHA KHAWAARIIJTA



## KHAWAARIIJTA DAACISH IYO SHABAAB OO KU DHUUMAALEYSANAYA BUURALEYDA BARI




Manaxeyaashii ku heshiiyay daadinta dhiigga islaamka iyo intay wateenba waxay maanta ku hardamayaan buuraha bari oo ay ka mid tahay galgala iyo kuwo kale.

Xaq baa isku diray waayo waxaa la yiri wixii baadil ku dhisma wiligoodba salkoodu waa hoog, waxay dad muslim ah gaaleysiiyaan maanta iyagaa isgaaleysiinaya oo is ciqaabaya ka dib markii ay ka firxadeen dagaallada ku soo wajahan iyay buuraha u carareen halkaasoo awal saldhig ay u ahayd daacish ayaa waxaa kusoo rogmaday daad ka soo firxaday koonfurta iyo bartamaha soomaaliya.

Daacish awal waxay soo dhaweyn jirtay oo ka faa'iideysan jirtay kuwa ka soo goosta shabaab oo ay askar ahaan u qoran jirtay, sidaa daraadeed waxaa weligoodba dhex yeellay colaad balse maanta faraha ayay isa saareen oo way is laynayaan waxayna ku dambeyn doonaan markay isku jabaan inta yaree ka soo hartana la soo qab qaban doono haddii Alle ka raalli noqdo.

Khawaariijta alshabaab ayaa guul darro weyn kala kulantay dagaalladii ay la galeen ciidammada dowladda iyo shacabka dib u xorreynta iyagoo laga qabsaday dhul aad u ballaaran oo markii hore ay ayagu ka talin jireen.

Waxay dhiigga muslimka ku tasbiixsadaanba manta iyagaa malaggood galay oo waxaa laga goob goobayaa godadka ay ku dhuumaaleysan jireen sidii bahalaha oo kale.

Faankii iyo baqbaqdii baroor ayaa ka dambeysay asaydii ay hooyooyin badan usaari jireenna manta iyaga ayay heysataa tii tu ka daran.

Khawaariijtu waxa gubi jireen raashinka dadka masaakiinta ah loo wado iyagoo sidoo kale ceelasha ka duugi jiray guryahana dab ku qaban jiray manta ilaah wuxuu gartay in ayaga cunaqabateyn lagu soo rogo oo ay gaajo iyo harraad u dhamaadaan kuna baqtiyaan gododka waxaana la baday in saxarada iska dhaqaajin waayaan cabsi daraadeed.

Waxaa jabay oo guul darrestay dhammaan khawaariijta daacish iyo shabaab iyo wixii la hal maala.

Waxaana guul iyo rayn rayn ku jira ciidammada xoogga dalka iyo geesiyaasha sooma jeesteyaasha ah ee Macawisleyda, argagixisada iyo dhammaan khawaariijta ku faafay dalka ayaa waxaa la filayaa in dagaalka wejigiisa labaad lagu soo afjaro iyadoona tani ay noqon doonto wax ay soomaali ka sheekeyn doonto taariikhdana meel madow ka geli doonto.

Waxay noqon doontaa waayo aragnimo ay shacabka soomaaliyeed mar kale ka fiirsan doonaan inaysan dhicin in mar kale loogu soo gabado diinta waana fal fal xumo ay yaqaanaan khawaariijta oo keliya.

DALKA EDATORIAL

gubeen, qaar gowraceen, qaarna ay xabado darandoori ah madaxa kaga toogteen.

Inkastoo sababta dhacdooyinkaas keentay aan illaa hadda fasiraad quman iyo wacaal sugan laga hayn haddana cirroole iyo carruurba dadweynaha soomaaliyeed waxaa ka soo hadhay dhagaygag iyo dhabanaha hays.

Murugada iyo mooraal-dillaaca aan dhammaanteen la madluunsanahay ka sokow gacan-ku-dhiigleyaashii weli lama soo qaban oo aradka ayay nabad ku mushaaxayaan ama cid kalaaba gabaad iyo gurmad taageero ah siinaysa oo caddaalada ka qarinaysa ayaa ah waxa walbahaarka iyo wadna garaaca sii kordhinaya.

Waa run oo garaad laawe yeelkiise idilkeen waxaa ku nafisi lahayn inaan idheheenno shanta ah marqaati gacanta kuwaas oo la soo qabto lana mariyo caddaaladda, balse inay iska taxaashayaan oo bedqaba ifka joogaan ayaa quus iyo qalbi-jab ku ah cidkastoo dareen damqada leh.

Ugu dambayn si aan caro Eebbe iyo cuquubo adduun uga nabad-galno waxaa inala gudboon inaan ka qeyb-qaadanno soo qabashada arxan-laaweyaasha wax ma garatada ah ee ka ajoon waayay inay dumarka iyo birmagaydada gumaadaan.

WQ: Abwaan Hareeri

## KUWA DADKA ISKA DILA



Dilku waa fal-dambiyeedka ugu xun ee aadmiga iyo noolaha kaleba loo gaysto, waana mid ka mida 7-da waxyaabaha oo sameyntooda halaagga iyo carada Eebbe lagala kulmo.

aa dhacdo anfariir iyo argagax leh oo aan ku

kiciddeeda aan cidina gar maan-gal ah iyo marmarsiyo toona u helayn, maxaa yeelay waa waxyeello aan ka soo kabasho lahayn oo nolosha uunka Eebbe qeyb ahaan baabi'inaysa.

Ayadoo ay sidaa tahay haddana dilku

way kala yaab iyo xanuun badan yihiin, waxaana ugu daran kuwa sabab ahaan ku qotoma wax fudud oo aan macno weyn lahayn ama ay gaysato cid aan laga filayn, oo inay dhibaatadaa ku dhiiranayso garaadka suubani diidayo.

Intaasi waa weedhaha dhiigga uumiyaha oo la daadiyo iyo dilka birmagaydada culayskooda lagu tilmaami karo kuwa ugu fudud, hayeeshee damiir iyo damqasho diinta iyo dhaqan-wanaaggu ay hagayaan haddii la waayo qurgooyada iyo khaarajinta dadka aan waxba galabsanin waxay noqanayaan war-celinta koobaad ee qof kastoo yar laga halleeyaahiba uu ku kaco.

Balaayo marna waad maqashaa iyo marag baad u tahaye dalkeena todobaadyadii ugu dambeeyay waxaa ka dhacayay falal guracan oo aan hore loo arag, kuwaas oo ay ugu argagax badnaayeen haween raggii qabay ay qaarna

## Ciidanka Xoogga Dalka oo howlgal qorsheysan ku khaarijiyay maleeshiyaad ka tirsan Khawaarijta



Awdheegle):– Guutooyinka Gorgor iyo 14-ka October ee ka tirsan Ciidanka xoogga dalka Soomaaliyeed ayaa howlgal qorsheysan ku beegsaday maleeshiyaad ka tirsan Khawaarijta, oo ay ku jiraan horjoogayaal, kuwaas oo ku sugnaa deegaanka Jowhar-Awdheegle oo 5 KM u jirta degmada Awdheegle.

Howlgalka ayaa lagu bartilmaameedsaday goob ay Khawaarijta isugu yimaadeen shirar iyo abaabul ay ku doonayeen inay ku dhibaateeyaan shacabka Soomaaliyeed ee aan waxba galabsan.

Ciidanka Guutada 175-aad ee Gorgor iyo Guutada 146-aad ee 14-ka October ayaa si wadajir ah u fuliyay weerarkan qorshaysan, iyaga oo khasaare kala duwan gaarsiiyay kooxaha argagixisada ah ee aan naxariista lahayn.

## CIIDAMADA JUBBALAND OO FASHILIYAY MIINOOYIN AY AASEEN KHAWAARIJTA

Kismaayo- Ciimada sugaya amaanka deegaanka Buulo Xaaji ee Gobolka Jubbada hoose ayaa howlgal miino baaris ah ka fuliyey Tuulada Laagta caanoole oo Galbeedka kaga beegan deegaankaas.

Ciimada ayaa fashiliyey miinooyin ay waddada dhinaceeda ku aaseen Malleeshiyaadka khawaarijta si ay ugu waxyeelleeyaan bulshada iyo Gaadiidka isticmaalaya halkaas.

Saraakiisha howlgalkaan hoggaaminaysay ayaa Warbaahinta Qaranka u sheegay in xogta miinooyinka



ay la soo wadaageen shacabka deegaanka taasna ay keentay in ay fashiliyaan Miinooyinka.

## CIIDANKA XOOGGA DALKA IYO KUWA DEEGAANKA OO HAWLGALO KA FUKIYEY GOBOLKA BAAY

Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ayaa howlgal qorsheysan oo ka dhan ah Khawaarijta ka fuliyay deegaannada dhaca Waqooyiga Gobolka Baay, gaar ahaan waddooyinka isku xira Gobollada Baay, Bakool iyo Gedo.


Taliyaha Guutada 8aad ee qeybta 60aad ee Ciidanka Xoogga Dalka dhame Axmed Macalin Cabdiraxmaan (Axmed dheere) ayaa xaqiijiyay in mudadii ay ciidanku howlagalka qorsheysan wadeen ay cagta ku mariyeen goobo ay Khawaarijtu ku dhibaateyn jireen



dadka shacabka ah ee ku safra waddooyinkaas.

WARGEYSKA DALKA

# WARBIXINTA TODOBAADLAHA EE DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



Muqdisho:- 1- Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamud ayaa guddoomiyay shirka Golaha Amniga Qaranka oo looga hadley dagaalka ka dhanka ah Khawaarijta Al Shabab iyo sugidda amniga dalka.

2- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ayaa magaalada Nairobi kaga qeybgelaya Shirweynaha 6aad ee Qaramada Midoobay ee Arrimaha Degaanka.

3- Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa magaalada Muqdisho ku qaabilay Wasiiru Dowlaha Gaashaandhiga ee Dowladda Britain James Stephen Heappey.

4- Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa warqadaha aqoonsiga danjirenimo ka guddoomay Danjiraha cusub ee Kenya u fadhin doona Soomaaliya Cyprian Kubai Iringo.

5- Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa saxiixay sharciga illaalinta iyo maareynta deegaanka oo ay horray u ansixiyeen labada aqalka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

6- Ra'iisul Wasaare Xamza Cabdi Barre ayaa daahfuray Madasha Mabaadii'da Nabadda ee Soomaaliya.

7- Baarlamanka Federaalka Soomaaliya ayaa ku guda jira ka doodista cutubka 2aad ee Dastuurka Ku Meel Gaarka ee Soomaaliya.

8- Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Mudane Xamsa Cabdi Barre, ayaa guddoomiyey shir muhiim ah oo looga hadlayey qorshaha qaran ee hortagga dhibaatooyinka ay dalkeenna ku sababeen Isbeddelka Cimillada Adduunka.

9- Ra'iisul Wasaare Xamsa Cabdi Barre, ayaa kulan sagootin ah la qaatay Dowladda Turkiga Ibrahim M. Yagli oo xiligiisii uu dhammaadey.

10- Banaanbax lagu taageerayo heshiiska taariikhiga ah ee Soomaaliya iyo Turkiga oo ka dhacay garoonka ciyaaraha Eng Yariisoow ee magaalada Muqdisho.

11- Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska Mudane Daud Aweis Jama ayaa waddamaxa xubnaha ka ah Ururka Iskaashiga Waddamada Islaamka ka codsadey inay ku garab istaagaan Soomaaliya mowqifka ay uga soo horjeeddo xadgudubka Ethiopia ay ku soo faragelisay qaranimada iyo madaxbanaanida Soomaaliya.

Wasiirka Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee Soomaaliya Mudane Xasan Macallim Maxamuud iyo Wasiirka Cadaaladda Qatar,

1- Mudane Ibraahiim Bin Cali Almuhannadi ayaa kala saxiixday heshiis is-afgarad ah oo ku saabsan iskaashiga arimaha sharciga ee labada dal.

2- Wasiirka Gaadiidka iyo Duulista Hawada Fardowsa Cusmaan Cigaal ayaa sheegtay in hawlaha maareynta hawada Soomaaliya ay si buuxda bedqab ugu shaqeynayaan, isla markaana aanay jirin wax dhibaato ah oo ka taagan.

3- Madaxweynaha Dowlad Gobolleedka Hirshabeelle Mudane Cali Cabdullaahi Xuseen (Cali Guudlaawe) ayaa ka qeybgaley shir ay Hay'adda Maareynta Masiibooyinka ku soo bandhigtay warbixin ka xiriirta saameyntii ka dhalay roobabka iyo fatahaadihii Elnno ee degaanada HirShabeelle.

4- Wasiirka Waxbarashada Mudane Faarax Sheekh Cabdulqaadir ayaa ka qeybgaley munaasabad lagu xusayey Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo.

5- Maxkamadda Gobolka Banaadir ayaa soo gaba-gabeysay dhageysiga dacwad loo heysto eedeysane Sayid Cali Macalim Daa'uud oo ku eedeysanaa in uu gubay xaaskiisa oo u dhimatay dhaawacii soo gaaray.

6- Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Banaadir ayaa soo gaba-gabeysay dacwad rafcaan ah oo eedeysanayaal ay ka yihiin saraakiil ka tirsan Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Dowladda Soomaaliya taas oo soo socotay tan iyo bishii November 2023.

7- Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliya ayaa sheegtay in aysan jirin amni xumo iyo halis badqab oo ka jira hawada Soomaaliya.

8- Magaalada Muqdisho oo lagu daahfuray Hay'adda Dhowrista Xogta oo muhiim u ah keydinta xogta gaarka ah ee shacabka.

9- Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliya General Sulub Ahmed Firin ayaa Mudane Qaasim Axmed Rooble u magacaabey inuu noqdo Afhayeenka cusub ee Ciidanka Booliska.

10- Wasiirka Beeraha iyo Waraabka Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdi Xayir Maareeye ayaa magaalada Muqdisho ku qaabilay Dr. Mamoon Al Alawi oo ah Xoghayaha Guddiga la Dagaalanka Ayaxa ee Mandiqadda Dhexe ee Hay'adda FAO.

11- Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee Soomaaliya Mudane Xasan Macalin Maxamuud ayaa ka qayb galay munaasabada sanad-guurada 54aad ee Aasaaska Ciidanka Asluubta Soomaaliya oo lagu qabtay magaalada Muqdisho.

12- Ciidanka Xoogga Dalka iyo shacabka degmada Xarardheere ayaa dilay 10 xubnood ka tirsan Khawaarijta Al Shabab kadib hawlgal milateri oo ay ka fuliyeen degaanka Baraag- Cali Gaduud.

13- Ciidammada Xoogga Dalka saaxiibada caalamka ayaa dilay 30 xubnood oo ka tirsan Khawaarijta Al Shabaab, kadib hawlgal ka dhacay degaanka Jilib-Marka ee gobolka Shabeellaha Hoose.

14- Guddoomiyaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Maxamuud Macallin Cabdulle ayaa kulan la qaatay Madaxa USAID Soomaaliya Sheri-Nouane Duncan-Jones.

15- Cutubyo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka ayaa ka qeybgalaya dhoolatus milateri oo calami ah oo ka socda Kenya.

16- Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliya, Mudane Ahmed Said Mohamed, ayaa magaalada London kulan kulan kula qaatey saraakiil tirsan Dowladda Britain.

17- Guddoomiyaha Hay'adda Maareynta Masiiboyinka Maxamuud Macalin iyo mas'uuliyiin ka tirsan Dowlad Goboleedka HirShabeelle ayaa booqday biya xireenka Sabuun ee duleedka magaalada Jowhar.

# LA SOCO SHARCIGA WARBAAHINTA QARANKA

QodobLa 40aad:

Kaalinta Wasiirka ee hergalinta xeerLan

40.1- Wasiirka Wasaaradda Warfaafintu wuxuu awood u leeya hay:

B- Inuu hirgalinayo xeerhoosaadka lagu dhaqan galinayo Xeerka Saxaafadda oo ay ku heshiiyaan, wada jirna u soo saaraan Wasaaradda Warfaafinta iyo Wasaaradaha Warfaafinta Dowlad Goboleedyada iyo Guddiga Saxaafadda Soomaaliyeed hadday tahay Qodobka 5.1(T) oo ah ganaax lacageed, Qodobka

9.1 Bixinta Shatiyada, Qodobka 13.1 oo faraya Codsiga Ruqsadda Warbaahinta

jirtay 45 maalmood gudahood marka sharcigu dhaqan galo, Qodobka 17.1 Khidmadaha, Qodobka 18-aad Diiwaan gelinta Suxufiyiinta iyo Qodobka 34- aad Khidmadda lagu firsado TV-ga.

T- In uu fadhi deg-deg ah isugu yeeri karo Guddiga Saxaafadda xaalad jiFta awgeed iyo

X-In uu qaadan karo go'aan deg-deg ah oo la xiriira amniga oo ka dhalatey

hey'adaha warbaahinta

QodobLa 41aad: Baabi'in

41.1- Xeerkani waa xeerka Saxaafadda Soomaaliyeed iyo Suxufiga Jamhuuriyadda Soo maaliya, waxaa na la baabi'iyey xeer kasta oo saxaafade ed oo ka soo ho r-jeeda ama aan la socon karin xeerkan.

Qodobka 42aad: Dhaqan-gal

42.1- Xeerkan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Somaaliya, Madaxweynuh una saxeexo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

# DHAMMAAD

SONNA
وكالة الأنباء الوطنية الصومالية
Somali National News Agency